HORIZON INSTITUTE

# *Cagajuglaynta Garsoorku ku hayo Qareenada Somaliland waxa ay Wiiqaysaa Sarraynta Sharciga*

**25 February 2021**

Laba xukun oo dhawaan ay gaadhay Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex ee Hargeysa, iyo qaabkii loo gaadhay go'aanadaasi, waxa ay abuurayaan su'aalo culus oo ku saabsan xaaladda garsoorka. Go'aanadaasi waxa ay xakamaynayaan xorriyaddii qareenadu ay kaga hadli lahaayeen arrimaha danta u ah bulshada, in ay maxkamadda sharciga ah ku matalaan dadka ay u adeegayaan iyo in ay cabbiraan fikirkooda, xuquuqdooda k`uwaas oo dhammaantood ay illaalinayaan Dastuurka iyo Xeerarka Somaliland.

28 January 2021, Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa ayaa wareegto u dirtay shacabka deggan Hargeysa. Ogeysiisku waxa uu ku wargelinayey qorshaha Wakaaladdu ay ku soo bandhigayso saacadaha biyaha oo cusub kuwaas oo lagu macneeyey " in ay faa'iido dheeraad ah u leeyihiin macaamiisha iyo Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa." Dhammaan macaamiisha waxa loo sheegay in ay ku khasban yihiin in ay ka iibsadaan saacadaha cusub isla Wakaaladda. Wareegtada waxa lagu soo gebogabeeyey in qiimaha saacadda cusubi tahay kaliya $50."

Qoysas badan, dhab ahaantii $50 waa culays dhaqaale oo ayna awoodin, gaar ahaan waqtigan ganacsigii iyo fursadihii shaqadu ay hoos u dhaceen saameynta xanuunka Covid-19 awgii, iyo maciishaddii Hargeysa oo kor u kacday. Sidoo kale waa kharash ay dad badan ku adag tahay in ay fahmaan xikmadda ka danbaysa maadaama saacadaha hadda la isticmaalaa ay sifiican u shaqaynayaan isla markaa ayna muuqan sabab loo tuuro loona aqbalo kuwo ka qaalisan oo aan loo baahnayn.

11 February 2021, *Talosan Law Firm and Legal Services* waxa ay soo saareen warbixin ku waajahan dadweynaha Somaliland, gaar ahaan dadka ku nool Hargeysa, iyaga oo u soo bandhigay in ay u fidinayaan adeeg sharci oo bilaasha ah dadka raba in ay maxkamadda horteeda kaga doodaan go'aanka Wakaaladda. Ujeedada dacwaddan, sida ku xusan warbixintu, waa " in laga doodo go'aanka amarka ah ee Wakaaladda Biyaha Hargeysa ee

bilaa Sumada iyo bilaa Sababta." Iyaga oo tallaabadaa ku sheegay "mid sharciga baalmarsan" isla markaa "awoodii Xafiiska dawlada ee bulshada u adeegayay sifo qaldan loo adeegsaday" Talosan sidoo kale waxa ay soo bandhigeen su'aalo kale.

> Dani uguma jirto bulshada loo adeegayo, mana waafaqsana awoodda Wakaaladda Biyaha Hargeysa oo ah hay'ad dawli ah oo aan ahayn shirkad macaash doon ah.

Koox ka tirsan dadweynaha ayaa qaatay taladii ay soo jeedisay Talosan si ay hab sharciga waafaqsan uga hor yimaadaan amarkaas. Xaqa in ay sidaa sameeyaan waxa uu ku xusan yahay Dastuurka Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Somaliland Lr. 24 ee 2003. Sida ku qoran Qodobka 28 (1) ee Dastuurka, iyo Qodobka 4(1) ee xeerka Nidaamka Garsoorka, qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu dacwad xeerka waafaqsan ka furto maxkamadda awoodda u leh. Qodobadani waxa ay sheegayaan, si shaki la'aan ah, in qof kasta oo raadinaya in uu soo bandhigo wax uu u arko caddaalad darro, ama danbi, waxa loo ogol yahay in uu billaaban karo dacwad sharciga waafaqsan.

Balse, Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa ayaa u gudbisay cabasho Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex oo ka dhan ah Agaasimaha *Talosan* oo saxeexay warqadda, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud, oo loo yaqaan Buraahni, taas oo ay daba socotay in Gudoomiyaha Maxkamaddu, Cabdi Qawdhan Cabdi, soo saaro warqad waaran qabasho ah. Jiritaanka waaranka qabashadu waxa ay soo shaac baxday markii Ururka Qareenada Somaliland (SOLLA) ay qabteen shir-saxaafadeed 15 February 2021 si ay codkooda ugu muujiyaan in ay ka soo horjeedaan amarka qabashada ee ka dhanka ah Agaasimaha *Talosan*.

Amarka qabashadu maaha mid ku qotoma sharciga. Waxa uu xadgudub ku yahay xaqa uu qareenku u leeyahay in uu ku matalo macmiilkiisa/keeda. Qodobada 13 iyo 14 ee Xeerka Qareenada Somaliland Lr 30 ee 2004 waxa uu dhigayaa habka iyo hannaanka anashax marinta qareenada ku guul daraysta in ay buuxiyaan waajibaadkii sharci iyo hay'adaha ay tahay in ay anshax mariyaan. Balse, qareenkan laguma eedayn in uu ku guul daraystay waajibaadkiisii. Waxase maxkamaddu ku ciqaabtay in uu gutay waajibaadkiisii shaqo. Cabashada ka dhanka ah may soo hor dhigin hay'addii awoodda u lahayd, balse waxa soo gudbisay Wakaaladda Biyaha, taas oo meelnaba xeerku ugu ogolaanayn in ay soo farageliso shaqada qareenka.

Go'aanka Maxkamadda Gobolku waxa ay sidoo kale u diiday muwaadiniinta degan Hargeisa ee taageerada sharci u doontay *Talosan taasi oo ah* xaqoodii dastuuriga ahaa in ay dacwad ka furan karaan maxkamadaha meel kasta oo Somaliland ah, isla markaa uu matalo qareen. Qodobka 17 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Somaliland waxa uu xaq u siinayaa xubin kasta oo dadweynaha kamid ah xorriyadda uu ku qabsan karo qareen dacwad kasta oo sharci ah.

Shirkoodii saxaafadda, qareenadii u hadlayey SOLLA arrintaa si cad ayay uga hadleen. Mid kamid ah ka qayb-qaateyaasha ayaa soo bandhigay su'aalahan.

> Dawladdu hadii ay diido in waaxdii garsoorka loo cawdo, oo ay diido in sharciga iyada lagula doodo, maxay doonaysaa? Waaxda garsoorku waa waax dawladii ka mid ah. Isla sharcigii baa lagaga cabanayaa. Nidaamkii sharciga bay muwadiniintu raacayaan. Haday

> diidantahay in laba cawdo oo lala doodo, oo weliba shuruucdii dalka lagula doodo, dawladdu maxay doonaysaa? Ma iyadaa dadkii kicinaysa, mise iyadaa dadkii dejinaysa? Xaqiiqatan iyadaa dadkeedii dilaysa. Dawladnimada ceeb bay ku tahay in ay tidhaahdo la ilama doodi karo. Cid kasta waa lala doodi karaa. Madaxwaynaha oo qaranka ugu sareeya hadii maanta dacwad lanooga keeno, xaq muwaadiniintu waxay u leeyihiin in aanu dacwadahooda dastuurig ah u gudbino.

Mid kamid ah qareenadii SOLLA ee ka hadlay shirkaa saxaafadeed, Xamse Maxamuud Xassan, ayaa isbarbardhig aan fiicnayn ku sameeyey maxkamadaha Somaliland iyo Maxkamaddii Bad-baadada, oo sumcad xumo ugu suntanayd taliskii Maxamed Siyaad Barre.

Maxkamadda Gobolka ee Maroodi-jeex degdeg ayay uga soo jawaabtay. 21 February 2021, Gudoomiye, Cabdi Qawdhan Cabdi, waxa uu go'aamiyey in Xamse Maxamuud Xasan laga mamnuuco in uu ku shaqaysto qareen muddo hal sanno ah danbi lagu macneeyey " in uu ka soo horjeedo anshaxa xirfadda qareenimo, kana soo horjeeda sharafta qaranka Somaliland iyo garsoorka" Sida ay maxkamaddu sheegtay, qareenkani waxa uu halis ugu jiray "xabsi muddo dheer ah" maadaama " uu warbaahinta la hadlay."

Go'aankiisa, Gudoomiyuhu muu ku xusin xeerka u siinaya awoodda uu ku hakinayo liisanka qareenka kagana mamnuucayo shaqadiisa. Muu samayn, maxaa yeelay ma jiro xeer awood u siinaya garsooraha awooddan iyada oo ay maqan tahay caddayntii in danbi la galay.

Haddii hoggaanka garsoorku ka doonayaan dadweynaha, iyo qareenadu in ay rumaystaan in caddaaladi ka jirto Somaliland, isla markaa la ixtiraamayo Dastuurka iyo xeerarka, waa in ay xaqiiqadan ku muujiyaan tallaabooyinka, go'aanada iyo xukunada ay gaadhayaan.Labadan go'aan ee ay gaadhay Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex, ee ay indhaha ka qarsatay xuquuqda dastuuriga iyo xuquuqda sharci ee qareenada iyo dadweynaha, waxa ka dhalanaya hadaf dhab ahaantii ka soo horjeeda kii la doonayey in la gaadho. Saameynta ay leedahay waa in lagu abuuro cabsi, laga niyad jabiyo dadka in ay maxkamadaha u adeegsadaan goob ay si nabdoon ugu xalliyaan khilaafaadkooda, waxana ka dhalanaysa in ay u arkaan in Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex dhab ahaantii uuna rumaysnayn sarraynta sharciga.

Garsoorku waa in uu tallaabo qaadaa uu farriin adag ugu dirayo dadweynaha in garsooreyaasha aan loo ogolayn in ay indhaha ka qarsadaan Dastuurka iyo xeerarka Somaliland. Gudida Sare ee Caddaaladda, oo ay masuuliyadooda tahay in ay anshax mariyaan garsoorayaasha iyo ku xigeenada xeer ilaaliyeyaasha, waa in ay u baadhaan sida ugu wanaagsan, iyagoon dibu uga dhacayn, islamarkaana ka qaadaan xayiraada sharci darada ah ee la saaray qareen Xamse Maxamuud Xassan iyo in ay laalaan waaranka qabasho ee ka dhanka ah qareen Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Burhaani), maadaama aan labadaasi go'aan midna sharciga waafaqsanayn. Guddidu waa inay sidoo kale anshax-mariyaan garsoorihii soo saaray amaradaa sharci darada ah si waafaqsan qodobka 35 (2)(a) ee xeerka nidaamka garsoorka Somaliland maadaama uu ku xad-gudbay waajibaadkiisii shaqo.

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org.***